

Wax ka qabashada Dabeecadaha Dhibaataada leh

Su'aalo muhiim ah oo aad weydiin karto

- Waa maxay sababta dabeecadaan gaarka ah ay walaac u keeneyso?
- Xagee kale ayaa dabeecadaan lagu arkaa?
- Intee in le'eg ayay soo socotay goormeyna bilaabatay?
- Goorma iyo halkee ayay ka dhacdaa? Ma jiraa wakhti ama meel gaar u ah?
- Dad gaar ah miyeey ku lug leedahay?
- Maxaa ka dhasha dabeecadaan?
- Maxaa la sameeyay si looga caawiyo ilmuhu in uu beddelo dhaqankiisa?
- Maxaad u malaynaysaa in ay tahay sababta ilmuhu uu sidaan ugu dhaqmayo?

Hagaha Isbeddelka Dabeecada

- Ku qeex dabeecadda ama dhaqanka jumlad gaaban. "Jerry wuxuu dhagax ku tuuraa Sarah mar kasta oo ay soo gasho aagga xaafada." Ku xus hal dhaqan oo kaliya jumlada.
- Soo ururi macluumaadka: goorta, meesha, waxa dhacaya ka hor, inta lagu jiro, iyo ka dib marka dhaqanku dhaco. Lasoco hab-dhaqanka laba ama saddex maalmood adoo raadinaya qaababka dhaqanka ee isla xiriira.
- Abuur fikrado. Ka fikir xalalka suurtagalka ah ee lagu xalin karo dabeecadda ama xaaladda.
- La tasho qoyska oo u soo bandhig inay qayb ka noqdaan xalka. Ixtiraam fikradahooda ku saabsan sida ugu fiican ee lagu caawin karo ilmahooda.
- Doorro hal ama laba ra'yi oo lagu hirgelin karo goobta xanaanada ilmaha iyo guriga labadaba.
- La wadaag dadka kale qorshaha. Hubi in qof kasta oo ku lug leh uu fahmay doorkiisa. Hayso bayaan qorshaha ah oo qoran si aad u siiso waalidiinta iyo macalimiinta (faahfaahin kooban oo ku saabsan shirka lala qaatay ilmaha, go'aamada la gaaray, iyo doorka qof walba uu ku leeyahay qorshaha).
- Deji taariikh cad oo bilawga iyo dhamaadka ah. La soco qorshaha.
- Qiimeey qorshaha. Mar labaad la kulan qoyska. "Siduu u shaqeeyey qorshuhu?" "Maxaa lagu guulaystay?"